

1.1 Ma u baahan tahay gargaarayaal khaasa iyo qalab ilmahaaga yar?

Ma u baahan tahay qalabka caawimada socodka ama qalab kale?

Barnaamijka Gargaarayaalka iyo Qalabka [Aids and Equipment Program (A&EP)] ayaa laga yaabaa inuu ku caawimo inaad hesho gargaarayaal, qalabka wax ka bedelid lagama maarmaan ah (sida birta la cuskado). Marmarka qaarkood waxaad kaloo door ka qaadan kartaa qiimaha iibka. Qalabku waxaa loo baahan yahay in uu kuu qoro dhakhtarka dabiici ku daawaynta; kaas oo la xiriiyaha A&EP isaga oo magacaaga ku hadlaya. Si aad u ogaato intaas ka badan una hesho foomka la xiriir bixiyaha A&EP oo ku yaalla:

Austin Health – Banyule: 9496 4094

Royal Melbourne Hospital - Parkville: 8387 2251 - Hume, Moreland

Royal Children’s Hospital
(ilaa 18 jir) 9345 5964

St Vincent’s Hospital, Darebin (Koonfur), Melbourne, Yarra: 9288 3858

Isbitaalada Waqooyiga: Nillumbik, Darebin (Waqooyi), Whittlesea: 8405 8594

Isbitaalada Galbeedka: Sunshine, Maribyrnong, Moonee Valley, Brimbank, Melton, Hobsons Bay, Wyndham: 8345 1267.

Ma rabtaa inaad tijaabiso qalabka ka hor inta aadan go’aan ka gaarin gadashada?

Yooralla Equipment Library oo ku yaalla Independent Living Centre, Brooklyn - 9362 6111 (Isniinta ilaa Jimcaha)

Xarunta Qaybinta Qalabka **Royal Children’s Hospital** - 9345 5325

Xarunta **Victorian Continence Resource Centre** waxaa laga yaabaa inay hayaan badeeco sambal ah oo aad isku deyi karto - 9816 8266

ComTEC Disability Communication and Technology Solutions oo ku yaalla Independent Living Centre, Brooklyn - 9362 6111

Ujro iyo lacag adeeg ayaa laga yaabaa in lagaa qaado.

Qaqlabka baahidaada wax ka qaban mayo miyaa?

Hadduu qalabka la isku raacsan yahay mid aan wax ka qabanayn baahidaada, waxaa laga yaabaa inaad awoodo mid si gaara laguugu sameeyo. Tabaruciinta ayaa tan sameeya waxaadna bixinaysaa keliya qiimaha alaabta iyo kharajka safarka.

La xiriir **TADVIC** tel 9853 8655.

Xalalka kharaj ku bixinta:

- Waxaad la xiriiri kartaa Kooxda Intake and Response oo ku tirsan Wasaarada Adeega Adamiga 1800 783 783 si aad uga hadasho xalalka kharaj ku bixinta.

Xalalka kale:

- **Variety Club** wuxuu siiyaa carruurta qabta baahi gaara waxyaallaha ay ka midkayihiinn qalabka tel: 8698 3900.
- **Lions** ama **Rotary Club** agtaada ah ayaa laga yaabaa inay kaa caawimaan kharaj-ururinta.
- Shabakada **Equipment Recycling Network** waxay leedahay qalab badan oo gacantii labaad ah oo qiima jaban lagu iibinayo. Ka wac 9879 5211 wixii macluumaad ah oo intaas ka badan. www.erni.asn.au

Ma u baahan tahay macluumaad badeecada Celin-la’aanta saxarada?

Haddii aad u baahan tahay badeecada celin-la’aanta ka raadi macluumaad xaashida 4.8 ee kitkaan.